# ((qofku waa kolba diinta(dhaqanka) saaxiibkii uu kusugan yahay uun,ee ha eego midkiin qofka uu lasaaxiibayo))

Abuu hurayra-Allaha karraalli ahaadee-waxuu nabiga kawariyey-naxariis iyo nabadi korkiiye-inuu dhahay: ((qofku waa kolba diinta(dhaqanka) saaxiibkii uu kusugan yahay uun,ee ha eego midkiin qofka uu lasaaxiibayo)).
[Xadiis Xasan ah] [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At-Tirmidi, Iyo Axmed]

waxuu caddeeyey nabigu-naxariis iyo nabadi korkiiye- inuu qofku ka.shabbaho saaxiibkii xagga hab dhaqankiisa iyo caadooyinkiisa, oo waliba ay saamayso saaxiib nimadu akhlaaqda,hab dhaqanka, sidaa tarteed ayuu ku boorriyey ummaddiisa xulashada saaxiibka fiican,waayo waxuu tusaa saaxiibkii iimaanka iyo hanoonka, hiil xagga khayrka ahna wuu u.ahaadaa saaxiibkii.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3122